



DARIS GEESI – QORSHAHA HADDII JIRO WALWAL OO JIR DILKA DADKA ISLA NOOL

Jir dilka ey la kulmaan dadka isla nool waxaa loo arkaa iney tahay dhibaato caafimaad daro hayso dhammaan bulshada aduunka ku nool. Baaritaano qaran oo ku saabsan nabadgelyo dareemida baa laga arkay in dadka inta ugu badan oo jir dil qof ey la noolyahiin u geysto ma ka soo dacwoodaan. Sidaas daraadeed dad badan baa nool nolol maalinkasto loo geysto jir dil. Sannadkasto waxaa dhinto in ka badan 20 qof oo sabab u tahay jir dilka uu ku suubiyay qofka ey la noolyahiin, inta ugu badan waa dumar, laakinn weey dhacdaa in carruur iyo rag nolosha ka qaado qofka ey la noolaayeen. Iswiidhan maalinkasto waxaa soo dacwodo 50 qof oo ku saabsan jir dilka ey kala kulmaan dadka isla nool. Waa jir dil qof ku suubin qofka kale uu la noolyahay, badanaa guriga dhexdiisa, oo run ahaantii laga doonaayo inuu ahaado meesha aduunka ugu nabadgalyada badan.

Ururka badbaadinta carruurta [Rädda Barnen] wuxuu xisaabiyay in Iswiidhan 10kii canug I ku noolyahiin guri ka dhaco jir dil. Waa ugu yaran 200 000 canug oo Iswiidhan ku nool. Carruurtaan aqoonta aan u leenahay baa ah in ayaga ku jiran halis ilaa boqolkii 10 in noloshooda ey la kulmi doonan jir dil iyo ahaan doonan qofka jir dilka geysanaayo. Anaga waan joojin karnaa silsiladaan oo jir dilka iyo anaga waxaan u baahanahay inaa is wada caawino sidaa u suurtagalino nolol tan carruurta uga sii wanaagsan. Anaga waxaa kale oo aqoon u leenahay in ugu yaran jiran 300 000 carruur ku nool guri joogto looga isticmaalo mukhaadaraadka iyo/ama ka jirto caafimaad daro cilmi nafsiga. Taasna keenikartaa in carruurtaas eysan heleyn daryeelka xaq u leeyahiin iyo sidaas daraadeed baranaayaan dabeecado iney gacantooda isku dhaawacan ama dadkale. Carruurtaas xitaa waan u baahanahay inaa anaga wada kaalmeyno iyo caawino intaa awoodno.

Waxaa kamid ah inaa ku martiqaadno fiikeysi markaa ka warhelno in dadkii weeyna eysan ka soo bixikarin ama awoodin iney tooda iyo tan canuga wax u qabtaan. Caawinaadaas waxey ahaankartaa inaad canuga siisid meel qaas u ahaato markuu gurigiisa ka heleyn degganaanshada uu doonaayo iyo ogeysiin walwal usoo gudbisid Xafiiska adeega bulshada [Socialtjänsten] siduu canuga u noqdo mid muuqdo iyo caawinaad u helo. Tan baa ah arrimada aan ku magacaabno ficilada yar yar oo qofka kale noloshiisa u noqon siduu ku baadbaadi lahaa iyo sidaas bey saameyntooda u noqon mid weeyn.

Waxaa kale oo aqoon u leenahay in maalinkasto ugu yaran 100 qof la kufsado. Intaas oo kufsi 17 kaliya baa soo dacwoto. Inta ugu badan kufsiyadaas (kuwa aan dacwo laga soo suuban) waxaa geysto qof oo qofka kale nolol la wadaago. Anaga waan ka hortagi karnaa kufsiyada ka dhax dhaco dadka isla nool. Cilmi baaritaanka waxaa lagu arkay in dadka loo kufsado ey dhiirigalin ka helaayaan iyo awoodaayaan iney diidaan haddii ey ogyahiin iney caawinaad helaayaan. Ayaga sidaas daraadeed waxey suubin diidmo muuqato (la maqli iyo la arki) haddii ogyahiin iney dariska ka helaayaan caawinaad. Aqoontaas baa anaga na siin fursad aan ku caawino ummada kale.

Haddii dariska isla go'aansadaan in arrintaan wax ka qabtaan waxaa la baadbaadin kara nolol iyo carruurta ku caawinkarnaa iney helaan mustaqbal iftiin leh. Ficil suubi oo ku garaac ilbaabka dariska aad ka walwalsantahay, ka wardoon xaaladiisa iyo boliiska soo wac haddii xaalad degdeg ey tahay ama xaalad hanjabaad leh.

**XASUUSNAAW IN HAL QOF WAXKASTO UUSAN QABANKARIN
– LAAKIIN DHAMMAAN AAN WAX WADA QABANKARNO!**